WAXA LAGA OGAANAYO EE KU SAABSAN

## IIBSIGA QALABYADA MAQALKA EE DHAQTARKA QORO

# Kahor Intaadan Iibsan

Yaan la kulmaa si aan u iibsado qalabyada maqalka ee dhaqtarka qoro?

Minnesota gudaheeda, maqal-yaqaannada iyo iibiyeyaasha qalabka maqalkuba waxay iibiyaan qalabyada maqalka ee dhaqtarku qoro. Under [Sharciyada Minnesota, cutubka 153A.15 farqadda 1(1) (https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/153A.15#stat.153A.15.1)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/153A.15#stat.153A.15.1), dadka ka yar 18 sano waa in uu qiimeeyo maqal-yaqaan ka hor inta aysan helin qalab maqal oo dhaqtarku qoro.

Ma khasab baa inaan arko dhakhtar caafimaad ka hor inta aanan helin qalab maqal oo dhaqtarku qoro?

Tan iyo Diseembar 2016, dadka intooda badan ee ka weyn da'da 18 sano uma baahna in uu qiimeeyo dhakhtar caafimaad ka hor inta aysan helin qalab maqal oo dhaqtarku qoro. Si kastaba ha ahaatee, haddii xirfadle uu ogaado inaad qabto mid ka mid ah xaaladaha soo socda, waa inuu kuu gudbiyaa dhakhtar si loo go'aamiyo haddii xaaladdaas lagu sixi karo daawo ama qalliin..

### Xaaladahan waxaa ku jira:

- Dhegtaadu waxay leedahay qaab aan caadi ahayn.
- Dhegtaada waxay ku dhaawacantay shil.
- Waxaad aragtay dheecaan (dareere) ka soo baxaya dhegtaada.
- Dhegtaadu waxay dareemaysaa xanuun ama raaxo-darro.
- Waxaad dhukay badan, ama waxaad u malaynaysaa in wax ku jiraan dhegtaada.
- Waxaad dareentaa wareer ama dareen ah inaad wareegayso ama lulmayso.
- Maqalkaaga ayaa si lama filaan ah isu beddelay.
- Maqalkaaga wuu is beddelaa (wuu xumaadaa kadibna mar kale wuu hagaagaa).
- Waxaad maqashaa dhawaq yeerid ama guux ah oo hal dheg oo keliya ku jira.
- Waxaad qabtaa maqal-lumis conductive ah, sensorineural ah, mixed ah, ama asymmetric ah.
  - Maqal-lumis conductive ah waxay ka dhigan tahay maqal-lumis ka dhalata cillado ku jira dhegta dibaddeeda iyo/ ama dhegta dhexe.
  - Maqal-lumis sensorineural ah waxay ka dhigan tahay maqal-lumis ka dhalata dhaawac ku yimaada dhegta gudaha iyo/ama neerfaha maqalka.
  - Maqal-lumis mixed ah waxay ka dhigan tahay isku darka maqal-lumis conductive ah iyo maqal-lumis sensorineural ah.
  - Maqal-lumis asymmetric ah waxay ka dhigan tahay in maqal-lumiska hal dhegood uu si weyn uga duwan yahay kan dhegta kale marka la eego heerar kala duwan oo dhawaaqyo ah..

Sidee ayay maqal-yaqaannada iyo iibiyeyaasha qalabka maqalka ugu kala duwan yihiin??

### Maqal-yaqaannada

- Qiimeeya maqalka, dheellitirka, iyo tinnitus-ka
- Talo ka bixiya, ku hagaajiya, kuna iibiya qalabyada maqalka ee dhaqtarku qoro iyo qalabyo kale oo caawimaad ah, oo ay ku jiraan qalabka lagu rakibo jirka gudihiisa.
- Haysta shahaado mastar ama dhakhtarnimo, waxayna dhammaysteen tababar shaqo oo kormeer lagu sameeyo. Sidoo kale waxay ku guuleysteen imtixaan wax-ku-ool ah..
- Aqoonsada, qiimeeya, daaweeya, oo dib u soo celiya awoodda bukaannada qaba dhibaatooyin dheeraad ah oo maqalka la xiriira oo aan ku koobnayn iibinta qalabka maqalka.

### Iibiyeyaasha Qalabka Maqalka

- Baara maqalka si ay uga caawiyaan macaamiisha xulashada qalabyada maqalka ee dhaqtarku qoro.
- Talo ka bixiya, ku hagaajiya, kuna iibiya qalabyada maqalka ee dhaqtarku qoro iyo qalabyo kale oo caawimaad ah.
- Ku guuleystay imtixaanno qoraal ah iyo kuwo wax-ku-ool ah.

Maxaan Ku Helaa Qoraal Ahaan?

### Xirfadlaha waa inuu ku siiyaa:

- Nuqul ka mid ah heshiiskaaga.
- Macluumaad ku saabsan dammaanadda qalabyada maqalka ee dhaqtarka qoro ee aad iibsatay.
- Hagaha isticmaalaha ee qalabkaaga maqalka.
- Ogeysiis sheegaya inaad joojin karto iibkaaga 45 maalmood gudahood.
- Ogeysiis ku saabsan xaqa aad u leedahay inaad joojiso heshiiska 3 maalmood gudahood haddii aad ka iibsatay qof gurigaaga kuugu yimid.home.
- Nuqul ka mid ah natiijooyinka baaritaanka maqalkaaga (audiogram-kaaga), haddii aad codsato.
- Dhammaan qalabyada maqalka ee dhaqtarku qoro waa inay muujiyaan magaca soo-saaraha ama qaybiyaha, magaca ama lambarka nooca qalabka, lambarka taxanaha ah (serial number), iyo sannadka la sameeyay.

### Sharciyada Muhiimka ah ee Minnesota

- **Maqal-yaqaannada:** [Sharciyada Minnesota, qaybta 148.512 (www.revisor.mn.gov/statutes / cite/148.512#stat.148.512.12)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/148.512#stat.148.512.12).
- **Iibiyeyaasha Qalabka Maqalka:** [Sharciyada Minnesota, qaybta 153A.13 (www.revisor.mn.gov/ statutes/cite/153A.13)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/153A.13).

DEPARTMENT OF HEALTH

# Iibsashada Qalabkaaga Maqalka ee Dhaqtarka Qoro

## Maxaan Sameeyaa Kahor Inta Aanan Iibsan?

✓ **Shsbarbar dhig oo wax ka baar**
Tayada, qiimaha, noocyada, dammaanadaha, warrantiyada, iyo heshiisyada adeeggu way kala duwan yihiin. Xirfadlayaal badan ayaa bixiya waqti dheeraad ah oo lagu tijaabiyo qalabyada maqalka ee dhaqtarku qoro, waqti dheeraad ah oo lagu joojin karo iibka, iyo warrantiyo iyo lacag-celin ka wanaagsan kuwa sharcigu farayo.

✓ **Dooro xirfadlahaaga**
Khasab kuguma aha inaad ka iibsato qofkii baaray maqalkaaga. Hubi caymiskaaga. Ogoow haddii aad leedahay caymis daboolaya kharashka. Sidoo kale ogow haddii aad u baahan tahay qiimeyn caafimaad si caymisku kuu daboolo.

9 **Weydii haddii xirfadluhu iibiyo noocyo kala duwan oo summado ah**
Qaar ka mid ah summadaha ayaa laga yaabaa inay adiga si ka wanaagsan kuugu habboonaadaan kuwa kale. Weydii booqashooyinka dabagalka ah ee hagaajinta iyo ku habboonaynta qalabka. Ogoow meesha aad tagi karto si wax looga beddelo iyo kharashka ku baxaya.

9 **Weydii telecoil-ka iyo nidaamyada hearing loop-ka**
Telecoil-ku wuxuu hagaajiyaa codka ka imanaya taleefannada iyo meelaha dadweynaha qaarkood.

✓ **Gorgortan geli**
Waxaad ka gorgortami kartaa astaamaha qalabka maqalka iyo heshiiska adeegga. Go'aanso astaamaha aad rabto.

✓ **Hubi in heshiisyada qoraal ku qoran yihiin**
Ka dhig heshiisyada la xiriira iibka, heshiiska adeegga, dammaanadaha, warrantiyada, baytariyada, iyo astaamaha ikhtiyaariga ah kuwo qoraal ah. Waxaad codsan kartaa in wax laga beddelo foomamka heshiisyada ee hore loo daabacay.

✓ **Weydii haddii xirfadluhu sameeyo "cabbirka dhegta dhexdeeda" (REM)** REM wuxuu cabbiraa sida wanaagsan ee qalabka maqalku u shaqeynayo marka uu dhegtaada ku jiro.

✓ **Go'aanso haddii aad rabto caymiska beddelka qalabkae** Isbarbar dhig qiimaha caymiskan iyo kan caymiska gurigaaga.

✓ **Weydii adeegga joogtada ah**
Qaar ka mid ah summadaha qalabka maqalka waxaa dayactirkooda ama hagaajintooda samayn kara oo keliya xirfadlayaal gaar ah.

## Ma Inaan Iibsadaa Qalab Maqal oo Dhaqtarka Qoro oo La Soo Isticmaalay Si Aan Lacag U Badbaadiyo?

Xirfadle ayaa laga yaabaa inuu iibiyo qalab maqal oo dhaqtarku qoro oo la soo isticmaalay ama dib loo dayactiray. Si kastaba ha ahaatee, xirfadlaha waa inuu kuu sheego in qalabka yahay mid la soo isticmaalay ama dib loo dayactiray. Sanduuqa qalabka iyo summad ku dhegganba waa inay si cad u muujiyaan in qalabku yahay mid la soo isticmaalay. Iibsashada qalab maqal oo dhaqtarku qoro oo la soo isticmaalay laguma talinayo.

## Ma Joojin Karaa Iibsigayga Oo Lacagtayda Dib Ma U Heli Karaa?

Waxaad joojin kartaa iibka sabab kasta ha ahaatee.. **Laakiin waa inaad:**

- Joojisaa iibka 45 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda iibka.
- Joojinta ku qortaa qoraal. Nuqul ka mid ah adigu hayso.
- Soo celisaa qalabka maqalka ee dhaqtarku qoro (ku soo dir boosto ama ku celi xafiiska).

Haddii xirfadluhu hayo qalabkaaga maqalka wakhti kasta inta lagu jiro 45-ka maalmood, waxaad helaysaa waqti dheeraad ah oo aad ku joojin karto iibka. Waxaad helaysaa hal maalin oo dheeraad ah 24-kii saacadood kasta ee uu xirfadluhu hayo qalabkaaga maqalka.

**Waxaad heli kartaa dhammaan lacagtaadii dib haddii:**

- Heshiiskaagu aanu sheegin inuu jiro "khidmad joojin," ama
- Aad qalabka maqalka ka iibsatay qof gurigaaga kuugu yimid, oo aad joojiso iibka 3 maalmood gudahood..

Haddii heshiiskaaga ku jiro "khidmad joojin," xirfadluhu wuxuu haysan karaa qayb ka mid ah lacagta. Khidmaddaasi kama badnaan karto $250. Xirfadlaha waa inuu lacagtaada kuu soo celiyaa 30 maalmood gudahood.

## Waxaan Iibsigayga Ku Sameeyay Guriga. Ma Leeyahay Xuquuqo Kale?

Haddii aad qalabka maqalka ka iibsatay qof gurigaaga kuugu yimid, waa inuu ku siiyaa "ogeysiis joojin." Ogeysiiskani wuxuu kuu sharxayaa xaqa aad u leedahay inaad joojiso iibka. Haddii aad joojinta ku samayso qoraal ka hor saqda dhexe ee maalinta saddexaad ee shaqada kadib iibka, waxaad heli kartaa dhammaan lacagtaadii dib. Waxaad joojinta siin kartaa xirfadlaha cinwaanka ku qoran heshiiska, ama waxaad ugu diri kartaa boosto cinwaankaas. Haddii aad boosto ku dirto, wakhtiga la tixgelinayo waa wakhtiga aad ku riddo sanduuqa boostada. Xirfadluhu waa inuu dhammaan lacagtaada kuu soo celiyaa 10 maalmood gudahood, xitaa haddii heshiisku sheegayo inay jirto khidmad joojin. Haddii xirfadluhu aanu ku siin "ogeysiis joojin," waxaad joojinta ku samayn kartaa hadal ahaan ama qoraal ahaan.

### Sideen ...

**U barta isticmaalka qalabka maqalka ee dhaqtarku qoro?**
Xirfadlahaaga waa inuu ku siiyaa hagaha isticmaalaha oo la socda qalabkaaga maqalka, waana inuu kula dul maraa hagahaas si uu kuugu sharxo sida loo isticmaalo.
**U dayactiraa qalabka maqalka ee dhaqtarku qoro?**
Dhammaan qalabyada maqalka ee cusub waa inay leeyihiin ugu yaraan dammaanad hal sano ah oo ka timaadda soo-saaraha. Haddii qalabkaaga maqalka uu ku jiro dammaanadda soo-saaraha, qalabka waa la dayactiri doonaa sabab kasta ha noqotee, oo ay ku jirto duugowga ka yimaadda isticmaalka caadiga ah. Waxa kale oo dammaanaddu ku jiri kartaa adeeg "nadiifin iyo hubin" ah.Heshiiskaaga wuxuu kuu sheegi doonaa dammaanadaha kale ee aad haysato. Dammaanad kasta waa inay qoraal ku qoran tahay. Xirfadlaha waa inuu ku siiyaa nuqul ka mid ah dammaanadda.